

Daryeelka Carruurta Ee Qoyska	Hagaha Kaqaybqaataha Kormeerka Firfircoon: Maareynta Khatarta ee Goobaha Daryeelka Qoyska	
Qaybtan labada saacadood ah waxay buuxinaysaa shuruuda tababarka Xeerka 2 ee tababarka kormeerka. La Cusboonaysiiyay 2/2024	2 Saacadood	

Xuquuqda lahaanshaha iyo Xadidnaanta Isticmaalka iyo Mas'uuliyadaha Ka Dhalanaya

Manhajkaan waxaa lagu diyaariyay maalgalin ay bixisay Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota. Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota wax wakiil ah kama ahan wax mas'uuliyad ahna kama saarna isticmaalkiisa ama natiijadiisa. Manhajkaan dib looma soo saari karo, lama koobin karo, lama iibin karo ama si kale looma qaybin karo ayada oo aan oggolaansho qoraal ah laga haysan Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:

DHS.Child.Care@state.mn.us

Guudmarka Casharka

Knowledge and Competency Framework (KCF, Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore, Aagga Maadada Child Development Associate (CDA, Isku Xirka Horumarinta Carruurta)

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (KCF) ee Minnesota ee Aagga Mowduuca Xirfadlayaasha Carruurnimada Hore iyo Aagga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (CDA) waxay halkan ugu qoran yihiin si ay uga caawiyaan ka qaybgalayaasha inay fahmaan kartida, nuxurka, iyo maadooyinka looga hadlayo tababarka.

Qaybta Nuxurka KCF: VII.B. Xaqiijinta Badbaadada

Aagga Maadada CDA: Qorshaynta deegaan waxbarasho oo badbaado ah, oo caafimaad qaba.

Ujeedooyinka Waxbarashada:

Dhammaadka tababarkan, kaqaybgalayaashu waxay awoodi doonaan inay:

- Qeex heerarka ruqsad bixinta ee Xeerka 2 aad ee Minnesota Department of Human Services (MN DHS, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota) ee ku aadan kormeerka goobaha daryeelka carruurta ee qoyska.
- Qiimeeyaan qaababka loo yareeyo ama loo baabi'iyo khataraha badqabka ee carruurta ka qabsada goobaha aan ruqsadda lahayn, aagaga muhiimka ah, iyo meelaha kulul ee gudaha xarumaha daryeelka carruurta ee qoyska.
- Abuuraan qorshaha kormeerka joogtada ah ee dib u eegista goobaha daryeelka carruurta si kor loogu qaado badqabka carruurta.

Ujeedooyinka Waxbarashada waa in dib loogu eegaa bilowga kulan kasta oo lagu dadaalo in la isku xiro nuxurka iyo jawaabaha ka qaybqaataha dib loogu noqdo ujeedooyinka kulanka.

Guudmarka Casharka

Wakhtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbaridda
10 daqiiqo	Soo dhawayn iyo hordhacyo	Khudbo yar Dooda kooxda ballaaran
20 daqiiqo	Qaybaha Kormeerka	Khudbo yar Dooda kooxda ballaaran Dooda kooxda yar Milicsiga shakhsi ahaaneed
30 daqiiqo	Kormeerka Goobaha aan Ruqsada lahayn – Goobaha Kulul	Howl koox ballaaran Hal Abuurka kooxda ballaaran Hawsha koox yar
30 daqiiqo	Aagaga Muhiimka ah: Khataraha Xayawaannada rabaayada ah, Caafimaadka, iyo Amaanka	Khudbo yar Dooda kooxda ballaaran Hawsha koox yar
20 daqiiqo	Qorsheynta Kormeerada Badqabka ee Joogtada ah	Shaqada gaarka ah Lammaanin iyo wax wadaagis
10 daqiiqo	Soo xiritaanka	Dib-u-eegista ujeedooyinka

Supervision Definitions

MN Rule 2 for Family Child Care	Best Practice: Caring for our Children
Minnesota DHS Rule 2 (9502.0315, subp. 29a) defines supervision as: "Supervision" means a caregiver being within sight or hearing of an infant, toddler, or preschooler at all times so that the caregiver is capable of intervening to protect the health and safety of the child. For the school age child, it means a caregiver being available for assistance and care so that the child's health and safety is protected."	Caring for our Children: National Performance and Safety Standards defines best practice: "Caregivers/teachers should provide active and positive supervision of infants, toddlers, preschoolers, and school-aged children by sight and hearing at all times, including when children are resting or sleeping, eating, being diapered, or using the bathroom (as age appropriate) and when children are outdoors.

Maareynta Khatarta Daryeelka Carruurta ee Qoyska

1. Aqoonso khatarta badqabka ee ka jiri kara goobta, ayna ku jiraan kuwa ku jira aagaga muhiimka ah iyo aagaga kuul.
2. Dhaqan geli qorsheyaal lagu yareynaayo ama lagu baabi'inaayo khataraha ku dhacaaya carruurta.
3. Qiimee bii'ada si joogto ah si aad u xaqiijiso in khatarta waxyeelada ama halistu ay hoosayso.

Khayraadka taageerada maareynta Khatarta ee goobaha daryeelka carruurta ee qoyska

Liinkiyada Shati-bixinta iyo Qawaaniinta

- [Xeer 2 ee MN ee Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)
- [Qawaaniinta Minnesota, Cutubka 142B – Xeerka Shati-siinta Adeegyada Aadanaha](#)
- [Daryeelka Carruurta ee Qoyska ee Shatiga Leh – Macluumaadka iyo Foomamka](#)
- [Liiska Hubinta Kormeerka Shati-siinta Daryeelka Carruurta ee Qoyska \(ELICI\)](#)

Ilaha Caafimaadka iyo Badbaadada

- [Sharciga Hawada Nadiifta ah ee Gudaha ee Minnesota](#)
- [Children's Safety Network](#)
- [Up and Away Medication Safety](#)
- [Tusmada: Geedaha Sunta ah iyo Daryeelka Carruurta ee Qoyska](#)
- [CPSC.gov Recall Subscription](#)
- [Machadka Kahortaga Dhaawaca Qoryaha](#)
- [Project Child Safe Resource Library](#)
- [Dabaal Caafimaad leh](#)

Ilo Xirfadeed oo Dheeraad ah

- [Caring for Our Children: Heerarka Waxqabadka Caafimaadka iyo Badbaadada ee Qaranka, Tilmaamaha Barnaamijyada Daryeelka iyo Waxbarashada Carruurta](#)
- [Xeerka Anshaxa ee National Association for the Education of Young Children \(NAEYC, Ururka Qaranka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar\) iyo Bayaanka Ballanqaadka](#)

Goobaha Kulul: Goobaha, khataraha, iyo Qorshaynta

Aqoonso goobahaaga kulul – aagaga aan ruqsadda lahayn ee bii'ada gurigaaga (goobaha gudaha iyo banaanka) Waa maxay khataraha ka jira goobahaan? Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi doonto si aad uga difaacdo carruurta khatarta?

Barta “Goobta Kulul”	Khataraha ka jira goobtaan	Xeeladaha Badbaadada

**Aagaga Muhiimka ah: Xayawaannada rabaayada ah,
Khataraha Caafimaadka, iyo Khataraha Amaanka**

Qaybta	Waa maxay khatarta waxyeelada u keeni karta ilmaha?	Tallaabooyinka lagu yareynaayo waxyeelada: Tixgeli shuruudaha ruqsad bixinta iyo xeeladaha farsamada ugu fiican
Xayawaannada rabaayada ah 		
Khataraha Caafimaadka 		
Khataraha Badbaadada 		

X	Liiska Hubinta Badqabka Bii'ada Gudaha/Banaanka Abuur liiska badqabka oo gaar u ah barnaamijkaaga.	Taariikhda la dhameeyay
	Liiska Hubinta Amaanka Maalin kasta Hubinta Amaanka subixii: musqulaha wadaaga ah, agabka nadaafada gaarka ah/daawooyinka, alaabaha nadaafada, qalabka, khataraha dhuun istaaga (biinanka timaha/legos), iwm, ka eeg boonbalaha/buuga bokiska "isbitaalka" si aad uga eegto alaabaha adiga ama carruurtu heshaan ee u baahan dayactirka, qasacyada qashinka ee gudaha/banaanka, aagaga aan ruqsada lahayn ee xiran ama aan la geli karin, daboolada banaanka ee la badelay, ganjeelada la xiray, ka eeg saxarada xayawaanka rabaayada aagaga ciyaarta, laxda xoonka, biyo fadhiya, waxyeelada daadka, agabka lama filaanka ah ee soo galay aaga ciyaarta, iwm.	
	Fiiro Gaar Ah:	

	Hubinta Badbaadada Bil kasta Inkasta oo agabkaan ay qayb ka yihiin hubinadeena badqabka ee maalin kasta, waxaa xaqiijin karnaa in si adag loo baaro si joogto ah ayna ku jiraan liiska hubinta sariirta ilmaha, tababarka dabka iyo daadka, hubinta alaabta guriga iyo qalabka si looga eego jeexdin iyo dilaac iyo alaab furmay (alaabta laalacshoowga, qalabka la fuulo, boonbaleyaasha la wado/baaskiilka, kuraasta dhaadheer, laalacshowga ilmaha dhashay ama aaladaha lagu ruxo), badel boonbaleyaasha haddii loo baahdo, heerkulka talaagada iyo biyaha	
	Hubinta Badbaadada ee Sanadlaha ah Badel baytariyada aalada sheegta qiiqa, hubi dab damiska, talaallada rabaayada, dhameystirka tababarka, baarista biyaha ceelka ee ceelasha gaarka loo leeyahay, iwm.	